

Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska.

*Sideebaad ku
garan kartaa una
caawin kartaa
haweenka
dulmiga ama
xumaanta
khatarta ku jira.*



Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska.

Ma ku saameysaa qof aad u malaynaysid inuu dulmanyahay ama la xumeeyay oo aan garanayn wixii uu sameyn lahaa? Wuxuu maqaalkani ama qoraalkani cadeynayaa astaamaha digniinta u ah iyo tallaaboyinka aad qadi kartid si aad u kaalmeysid.

Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska waxay u ololaynayaan garashada, sansaanka kor u qaadka ogaanshaha calaamadaha lago garto dumarka dhiban ama la xumeeyay si aay dadka ku dhowdhaw dumarka halista ku jira ama raga wax dulminaaya aay u kaalmeeyaan.

Qofkasta oo bulshada ka mid ahi door ama kaalin buu ka geli karaa ka hortaga cadaadinta dumarka la xumeeyay. Waxa aad la xidhiidhi kartaa ururada bulshadaada ee caawiya dumarka dhiban ama kuwa laga yaabo in aay dhibaatada gaystaan.

Ololahani waa mid ay wadaagaan Dowlada Ontaariyo, Maamulka Arimaha Dumarka ee Ontaariyo iyo Gudiga Khubarada Jiiraanka (deriska), Saaxiibada iyo Qoysaska, iskuna duba ridayso Xarunta Aqoon Baadhista iyo Wax Barashada ku saabsan Qalqaalinimada ku fool leh Dumarka iyo Carruurta.

Calaamaadaha Tusaalaha u ah Cadaadinta ama xumeynta

Waxaa laga yaabaa inaad tuhuntid in la dulminaayo ama la xumeynaajo jiiraan, saaxiib ama ehel, laakiin ma garanaysid waxaad samaysid ama sida aad uga hadashid. Waxaa laga yabaa inay ku saameysaa inaad ka walwalsan tahay in a ay ka sii xumaato arintu xaaladda ay taagan tahay haddii aad talaabo qaado. Haddii aad fahamsan tahay astaamaha digniinta ah iyo khatarta haweenka dulman ama la xumeeeyay, waad caawin kartaa.

Haddii aad ogaato qaar ka mid ah astaamaha digniinta, ogow inaad joogto waqtiga ugu haboon ee aad arinta gacan ka gaysan kartid ama wax ka qaban kartid.

Wuu yasaa ama xaqiraa
Isaga uun baa hadla, shekada
ama hadalka oo dhana
hogaamiya ama xakuma
Wuu ilaaliyaa had iyo jeer xitaa
marka ay shaqada joogto
Wuxuu isku dayaa inuu u soo
jeediyo inuu isagu yahay qofka
la dulmiiyay/xumeeeyay, wuxuuna
u dhaqmaa sidii wax
maskaxdiisa dhibaateysan
tahay
Wuxuu isku dayaa inuu ka
ilaaliyo ama ka fogeeyo dadka
Wuxuu ula dhaqmaa sidii qof
uu isagu leeyahay
Been buu u sheegaa siduu
isugu ekeysiiyo nin wanaagsan,
waxa uu ku fiican yahayna wuu
buunbuuniya/ka badbadiyya
Wuxuu u dhaqmaa sidii uu
isagu ka sareeyo ama ka qiimo
badan yahay dadka oo kale ee
gurigiiisa jooga

Waxaa laga yabaa inay raali
geliso una sameyso
marmarsiinyo dhaqankiisa
awgeed ama ay noqoto qof qeylo
badan oo dagaalamayso isla
markaana cadho/xanaaq hayo
Way kululaataa/kalababdataa
marka ay hadleyso ee uu isaga
joogo
Waxay u muuqataa qof
buka/jiran, badanaana way ka
joogtaa shaqada
Waxay isku dayda inay qariso
nabaradeeda
Waxay ka cudurdaarataa
daqiqada ugu dambeysa ay
kula kulmi lahayd ama waxay
iska ilaalisaa inay dariiqa
kugula kulanto
Waxaad moodaa inay
murugaysantahay, cidla tahay,
kana dhexbaxday wax walba isla
markaana baqaneyso/
cabsaneyso
Khamri badan iyo
mukhadaraadka maskaxda
dooriya ayay cabtaa si aay isu
ilowsiiso dhibatada

(Walow inta badan dhibaatooyinkaasi aay dhex maraan raga iyo
dumarka aay wax ka dhexeeyaan (heterosexuals), islamarkana
ogow raga noocyada kale sida: gays (raga aay wax ka
dhexeeyaan) iyo dumarka noocyada kale sida: lesbians (dumarka
aay wax ka dhexeeyaan) laftoodana waa aay la kulmi karaan.
Marka, talooyinka iyo soo jeedinta waraaqahan ku qoran waa
loo siman yahay qof waliba nooca uu doono ha ahaadee.)

Calaamadaha (Qofka) Halista ku Sugan

**Waxaa laga yaabaa inay khatartu ka
weyn tahay haddii:**

Xiriir/cilaqaad buu la
leeyahay iyada iyo
carruurteedaba

Wuxuu heli karaa hub marka
uu doonaba

Waa dulmiye ama xumeeye
hore taariikh u leh ama u soo
xumeeeyay dad hore

Wuxuu ugu handadey in uu
dhaawacaayo, ama dilaayo
haddii ay ka tagto. Wuxuuna
leeyahy "haddii gacantayda
aad ka baxdo cidkale u
gacan gali maysid ama
haddii aan aniga ku helin qof
kale kuma heleyso"

Wuxuu ku handadaa in uu
dhibaateynayo/wax
yeeleeynaayo carruurteeda
ama xayaanka aay
rabaysatay ama hantideeda
Wuxuu horey ugu handadey
in uu is dilaayo isaga
nafsadiisa

Horey ayuu u garaacay/ama
uu u ceejiyay

Nolashiisa waxyabo
waaweyn aya ka badelmay,
sida dhinaca (tusaale:
shaqada, kala tegida, ama
maskax wareer ku dhacay)

Waxa uu iska dhaadhacsiiyey
in aay rag kale cilaqaad
ama xiriir la leedahay

Dhawaan baay kala tageen,
ama waxay ku fekeraysaa
sidii ay uga tegi lahayd

Waxaa aay u baqaysaa
nafteeda iyo nabadgalyada
carruurteeda ama ma aragto
dhibaatada halista ay ku jirto
Welli dacwad baa u socata oo
ku saabsan cidii carruurta
haysan lahayd ama waxaay
haysataa carruur kale oo ay
qof kale u dhashay

Qof kale ayay xiriir la
leedahay ama wax ka
dhexeeyaan

Waxa uu ku eeddeeyaaa in aay
iyadu burburisay noloshiisa
ama dhibaateysay
Isagu cidna kaalmo ma
waydiisto

Talaabooyinkeeda aaya uu
ilaaliyaa ama fiiriya,
telefoonka waxa aay ku
hadasho ayuu dhagaystaa, e-
mailadeeda ayuu fiiriya ama
akhristaa, wuuna
dabaraacaa

Shaqooyinka kuma raago
ama ma haysan karo muddo
dheer

Maalin walba
mukhadaraadka maskaxda
dooriya ayuu qaataa ama
khamriga ayuu cabaa
Qaynuunka sharciga ma
xushmeeyo

Jidhkeeda waxa ku yaala
nabaro ama dhaawacyo aan
la sheegi karin meesha ay ka
yimaadeen
Iyadu awood uma laha
telefoon
Iyadu dhibaatooyin kale baa
haysta (tusaale: Af Ingiriisiga
ma taqaan, Kanadana sharci
weli kuma laha, meel fogna
waa aay ku nooshahay)
Saaxiibo iyo ehel ama qoys
midnaba uma joogaan

*Tirokoobyo baa cadaynaaya in aay dumarka 25 ka
yar, dumarka laxaadkoodu dhiman yahay, dumarka
dadkooda dalkan loogu yimid (natives) iyo
dumarka meherlaanta (commonlaw) lagu qabo aay
u horeeyaan dadka la cadaadiyo ama la xumeeyo.
(Eeg/Fiiri war bixinta aay soo sartay Tirokoobyada
Kanada ee lagu magacaabo Statistics Kanada:
Farasaarka Qoyska Kanada ku nool ee ka dhex
dhaca. Sansaanka Tirokoobka 2005.)*

***Waa tan dariiqyada qaarkood ee
aad ku caawin kartid markaad
ogaatid calaamadaha digniinta ee
dulmiyaha ama xumeeyaha:***

- Kala hadal waxaad aragtay una cadee inaad ka walwalsan tahay xaaladeedda. U sheeg iyada inaad rumeysantahay waxaanna aysan khalad ku lahayn.
- Ku dhiirigeli in aanay kala hadlin ama u sheegin lamaaneheeda haddi ay qorshaysatay inay ka tagto. Waxaa waajib ah in la ilaaliyaa nabadjelyadeeda ama amaankeeda.
- U sheeg inaad carruurta u haynaysid inta ay raadsanayso caawinaad.
- U sheeg inaad nabadjelyo ku siinaysid ama ay ku helayo gurigaaga iyada, carruurteeda iyo xayawaankeeda ay rabeytsatey, hana u ogolaan in uu lamaaneheeda soo galoo gurigaada.
- Ku dhiirigeli in alaabada muhiimka ay ku uruursato baag ama boorso yar oo aadna gurigada u dhigeyso, haddi ay u baahantahay.
- Ogow adiga iyo iyaduba waad wici kartaan telefoonka laga caawiyo haweenka dulman, hoyga haweenka dulman, ama haddii xaaladdu deg deg tahayna booliska.

**Waad ka timid ka hor istaagii sidaad
wax u kaalmeyn laheyd**

Haddii ay sheegi weydo in la cadaadiyey ama la xumeeyay:

- U cadee inay markay doonto kula hadli karto.
- Haka cadhoon ama xanaaqin oo ha dhibsan go'aankeeda. Waxaa muhiim ah in aad fahantid in laga yaabo inay baqanayso ama aanay diyaar u ahayn in ay qaado talaabada labaad.
- Isku day in aad fahantid sababta ay ugu adagtahay in ay hesho caawinaad. Waxaa ay dareemaysaa ceeb/fadeexo.
- U soojeedi inaad raacaysid haddii ay u baahantahay faahin dheeraad ah ama kaalmo.
- Haddii ay carruur leedahay, si fiican ugu sheeg inaad danaynaysid nabadgelyadeeda iyo tan carruurteeda iyo shucuurteedaba sidaas darteed waxaa laga yaaba inay si dhab ah u xusuusato xaaladda ay ku jirto haddii ay xusuusato inay carruurteeduna khatar ku sugantahay.

Halkan waxaa ku xusan walwalka kaa gali kara haddii Aad ku fakareysid in aad wax kaalmayso:

Qodobada ku saameysa

**Qodobada aay tahay in la
tiixgaliyo**

Waxa aad is tidhaahdaa
shuqlkaaga/dantaada ma
aha

Aritani waxa aay gaadhay
heer nolal iyo geeri la kala
dhextaagan yahay.
Dhibaatada iyo
xumaantana qof/cid walba
ayay khuseysa

Garan maysid wax aad ku
hadashid

In aad is tidhaa danbaan
ka leeyahay dadka xilna
waan iska saarayaa waa
bilow wacan

Waxa suurogal ah in aad
wax sii kharibto

Haddii anan waxba laga
qaban waxyeelooyinka ayaa
sii xumaanaya

Arintu ma gaadhin heer
booliska la gaadhsiyoo/loo
sheego

Booliska ayaa arintaan loo
tabo baray iyagaana ka
jawaabi kara haystana
hantida aay wax kaga
qaban karaan

Waxa laga yaabaa in aad
ka cabsanayso/
baqaneysid in
dhibaatadiisa kugu soo
wareegto adiga iyo
qoyskaaga

Kaligeed si gooni/keli ula
hadal. Haddii lagu
handadey booliska u sheeg

Qodobada ku saameysa

Waxa aay kula tahay in aanay doonayn in aay ka takto sababta oo ah iyada ayaa u soo noqnoqoneysa asaga

Waxaad ka baeysaa in aay adiga kaa cadhooto/xanaaqdo

Waxaad qabtaa/dareensan tahay in aay labada lamaane aay saaxiibadaa yihiin

Waxaad aaminsan tahay ama moodeysaa in haddii aay kalmo doonayso aay ku weydiisaneyso

Waxa aad u haysataa in arintan aay gaar u tahay dadka aay ku lug leedahay

Had iyo goor nabadjelyadaada ilaali ha dhex gelin dulmi ama xumaan. Wac booliska. Qof walba wuu ka shaqayn kara sidii uu uga hortegi lahaa dulmiga haweenka la xumeeyay.

Qodobada aay tahay in la tiixgaliyo

Waxaa suuragal ah in kaalmada aay u baahneeyd helin

Waa laga yaabaa, Iakiin wa aay ogaan doontaa in aad dan ka leedahay ama ka walwaleysid

Qof saaxiib kula ah ayaa la cadaadiyaa isla markana cabsi ku nool

Waxaa laga yaabaa in ay aad u cabsanayso kana xishoonayso in ay cidna kalmo waydiisato

Arintaasi kama suurogasho dadka dhibaatooyinkaas qaba

Telefoonka u garkaa ah ka waramida dumarka la garaaco ama la xumeeyay (Women's Helpline) waa 1-866-863-0511, ee 24ka (afarta iyo labaatanka sacadoodna furan). Isna waxa kale oo jira TTY oo ah 1-866-863-7868 wana leynka/qadka gaarka u ah war bixinta ku lug leh dumarka Ontaariyo ku nool ee la xumeeyay. Leynkan/qadka warka lagu sheegaa waa sir qofka warka bixinaayaana looma baahna in uu is magacaabo. Gargaarkani waa mid sir ah waxaana lagu heli karaa 154 luqadood.

Shaqaalaha telefoonka gargaarka waxa aay kaa caawinayaan sidii ay u kaalmeyn/caawin lahaayeen dumarka iyo raga dhibaataysan ee la xumeeyay. Waxa aay kula falaanqayn doonaan calaamadka lago garto cadaadinta ee aad aragtay, waxa aanay ku siinayaan talooyin muuqda oo ku caawin doona.

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan haweenka dulman ama la xumeeyay caawinaadooda (Women's Helpline) eeg/fiiri: www.awhl.org Haddii aay arintu deg deg tahay la xidhiidh booliska dagmadaada.

Reer Ontaariyo badankoodu waxa aay qabaan in aay masuliyadooda aay tahay in aay dhimaan inta karaankoodu yahay dulmiga ama xumaanta loo geysto dumarka. Calaamadaha arimahan ku lug leh ka dhig muhiimad. Wararka intaa ka si badan hadaad rabtaana booqo: www.neighboursfriendsandfamilies.on.ca

Haddii aad dooneysid in luuqada faransiiska laguugu shaqeyyo fadlan la xariir Femaide oo laga heli karo telefoonka lacag la'aanta ah ama bilaashka ah ee numberkiisu yahay 1-877-336-2433. Haweenka dhagooleyaasha ah amaba uu dhibaayo maqalka waxay la soo xariiri karaan qadka caawinaada oo telefoonka numberkiisu yahay 1-866-860-7082. Labadaan telefoonba way xafidan yihiin oo sirtaada lama ooqaa karo.

Haddii aad u baahan tahay xog ama faahfaahin intaa ka badan iyo hawlaha kale oo ay qabato Femaide fadlan booqo shabakadan: www.briserlesilence.ca